

FARIIMAHA URURINTA XAAKADA



1. **Shaybaadhka/Labaratooriga:** Goobo ama wareeg gali baadhitaanka la amray

2. **Bukaanka:**

- Ku qor magacaaga, taariikhda iyo wakhtiga ururinta weel kasta.
- Ku luqluqo biyo ka hor ururinta.
- Ku rid weelka nadiifta ah subaxnimada hore xaakada ugu horeysa oo gudaha ka soo go'day. Ka soo goo sambabka xaako adiga oo xoog qufac iskaga keenaya intii suurogal ah, halka aad candhuufta afka ku tufi lahayd weelka. Haddii ay dhib kugu tahay inaad xaako soo saartid, la xidhiidh dhakhtarkaaga si loo eego hab ururin oo beddelaad ah.
- Qaad kaliya hal xaako gudaha 24 saacadood.

Magaca Baadhitaan	Baadhitaan #/Fure	Weel	Faallo
Abuurka Xaakada, Midabeyn (Sputum Culture, Stain) (Baadhitaan Bakteeriya oo Caadi ah)	6561/SPU	Koob nadiif ah (leh fur lagu xidho)	Waxa ugu fiican in shaybaadhka lagu soo celiyo gudaha laba saacadood. Waxa lagu hayn karaa heerkulka qolk laguna soo celin karaa gudaha 24 saacadood haddii aanay suurogal ahayn in la soo celiyo ka hor. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo ah xaako. Shaybaadhka ayaa fiirin doona in la aqbali karo qaadistaada iyada oo la adeegsanayo abuurka bakteeriyada ee caadiga ah.
Abuur AFB, Midabeyn (AFB Culture, Stain) (Acid fast smear & Culture for mycobacteria/TB)	6617/AFC	Koob nadiif ah (leh fur lagu xidho)	Qaboojiyaha gali. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo ah xaako. Haddii dhawr qaybood la qaadayo maalmo kala duwan, qayb kasta ku rid weel gooni ah. Ku qor taariikhda iyo wakhtiga qaadista weel kasta. Dhamaan weelka ay ku jiraan qaybaha la qaaday waxa la galin karaa qaboojiyaha isku marna waa la soo celin karaa. Waxa lagu taliyay: Isku-darka 3 qaybood oo la qaaday subaxnimada hore maalmo kala duwan, oo loo qaaday sida uu dhakhtarka amray.
Abuurka Fangaska (Fungus Culture)	6579/FUN	Koob nadiif ah (leh fur lagu xidho)	Qaboojiyaha gali kuna soo celi gudaha 2 maalmood. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo ah xaako
Midabeyn Fangas/Nuumosistis (Fungus/Pneumocystis Stain)	3996 (Cytology Dept.)	Koob nadiif ah (leh fur lagu xidho)	Qaboojiyaha gali kuna soo celi gudaha 2 maalmood. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo ah xaako